

# LIGHT READING

customer newsletter

Nofeembar/Diseembar 2007

## Waxaad u diyaar noqotaa korontada go'da

Korontada go'da caadi ahaan waxaa ugu wacan cimilada iyo geedaha oo ku soo dhaca xargaha korontada. Xilli walba ayeey dhici kartaa, sidaa awadeed fadlan u diyaar noqo. Waxyaabaha soo socda ayaa ah macluumaad ku caawinaya:

- Waxaad haysataa alaabta xirmada ah ee korontada go'da. Waxaad raacisaa: tooshka, saacadda hawada ku shaqeysa, raadiyaha la qaato, bustada mylar, ulaha iftiima iyo batteriyaal. Waxaad ka fogaataa wax walba oo leh olol furan sida shumacyada.
- Haddii ay korontada kaa tagto, waxaad ka eegtaa halka laga xukumo korontada haddii uu fiyuus gubtay ama kala go' ku yimid. Sidoo kale waxaad eegtaa haddii ay wax gaareen halka ay korontada gurigaaga ka soo gasho.
- Haddii ay halka korontada gurigaaga ka soo gasho ay waxyeello gaareen, waxaad wacdaa wakiilka hay'adda adeegga korontada si uu talo kuu siiyo. Waxaad wacdaa **(206) 615-0600** adeegyada qaabilsan wixii waqooyi ka xiga Denny Way iyo **(206) 386-4200** adeegyada xagga koonfureed wixii ka xiga Denny Way. Hay'adda Korontada Magaalada ma dayactirto qalabka uu macaamilku iska leeyahay. Khabiirro shati leh ayeey tahay in ay qabtaan hawlaha korontada oo idil.
- Haddii aad ka shaki qabto in ay korontada kaa go'day, waxaannu qabnaa taleefoon af Ingiriis oo kaliya lagu hadlo lambarkuna waa **(206) 684-7400** waxaadna halkaan ka dhageysan kartaa hadal duuban oo sheegaya meelaha la hubo in ay korontada ka go'day. Waad soo wargelin kartaa korontada kaa maqan haddii aan hadalka duuban lagu sheegin. Isniinta illaa Jimcaha laga billaabo 7:30 subaxnimo illaa 6 fiidnimo, waxaad wici kartaa **(206) 684-3000** si aad ula hadasho wakiilka macaamilka. Haddii aadan ku hadal af Ingiriiska, waxaad codsataa adeegga turjubaanka.
- Waxaad dhintaa isticmaalka biyaha kulul. Biyo kuleyliyeyaasha badankooda waxay biyaha kuleylka ku haynayaan illaa seddex cisho.
- Cuntada waxay ku badbaadaysaa qaboojiyeyaasha illaa lix saacadood iyadoo illaa laba maalmoodna ku badbaadaysa qaboojiyeyaasha barafka dhala haddii uu albaabku xirmaado. Haddii aad isleedahay cuntada waa ay xumaatay, ha cunin.
- Waxaa fiican in aad haysato taleefoonka xariga leh. Taleefoonada aan xargaha lahayn ma shaqeeyaan koronto la'aan.

## Badbaadadu waa waxa ugu muhiimsan

- Xargaha korontada kala go'an ee soo raaraca aad ayeey khatar u yihiin. Waxaad ka fogaataa ugu yaraan in u jirta 10 cagood adiga iyo waxa aad sidato.
- Waxaad ka fogaataa sunta kaarbon monoxsaydh, oo aan la arag, urna aan lahayn oo wax ku dili karto daqiiqado gudahooda. Marna guriga gudihisa, garaashka ama meelaha xiran ha ku shidin qalabka ku shaqeeya shidaalka ama dhuxusha. Waxaad jeneraytarka ku isticmaashaa guriga dibeddiisa, meel ka fog daaqadaha furan iyo meelaha ay guriga hawada uga soo gasho. Marna ha u isticmaalin foomada gaaska ku shaqeysa in aad guriga ku kululeyso. Waxaad wax dheeraad ah ka barataa bogga internetka [www.metrokc.gov/health/disaster/carbon-monoxide](http://www.metrokc.gov/health/disaster/carbon-monoxide) ama waxaad wacdaa **(206) 296-4600**. Macluumaadka badbaadada, oo luqado kala duwan lagu tarjumay ayaad meelahaan ka helaysaa.



(Dib loo soo saaray iyadoo oggolaasho laga heysto Waaxda Caafimaadka Dadweynaha – ee Seattle iyo King County)

- Macaamiisha aan ka maarmin qalabka noloshu taageera waa in ay iska diiwaan geliyaan Hay'adda Korontada Magaalada. Si aad u hesho gargaar iyo macluumaad waxaad wacdaa **(206) 684-3020**. Waa in aad hesho qalab si degdeg ah aad u isticmaasho marka ay korontada go'do, oo aad taqaan sida loo isticmaalo marwalbana aad tijaabiso.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, waxaad booqataa bogga internetka ee [www.seattle.gov/light](http://www.seattle.gov/light).

# LIGHT

# READING

c u s t o m e r n e w s l e t t e r

## Xiriirka lacag bixinta

**Qorshaha lacag bixinta iyo warbixinta: (206) 684-3000.**

**TTY hadalka ama maqalka ka culus: (206) 233-7241.** Durbadiiba ina soo wac haddii aad filayso in uu qalad ku jiro biilkaaga ama haddii aadan biilkaaga bixin karin taariikhda lagaa doonaayo. Waxaad helaysaa adeegga turjubaanka haddii af Ingiriisku ahayn luqadda aad ku hadasho. Macluumaadka internetka waxaa laga helaa [www.seattle.gov/light/accounts/](http://www.seattle.gov/light/accounts/).

## Qorshooyinka soo socda ee lacag bixinta waa kuwo bilaash ah:

**Qaabka Lacag Bixinta ee Farsameysan: (206) 733-9100** ama [www2.seattle.gov/html/citizen/ach/](http://www2.seattle.gov/html/citizen/ach/). Biilkaagu si farsameysan ayaa looga saarayaa xisaabta socota taariikhda la doonaayo.

**Qorshaha Miisaaniyadda Lacag Bixinta: (206) 684-3345.** Waxaa loogu talagalay guryaha iyo macaamiisha adeeggoodu yar yahay oo kharashkoodu gaarayo \$100 ama ka yar. Kharashkaan waa mid tiro isla eg loo qaybinaayo kharashyadii korontada ee sanadkii hore, waxaana loo qaybiyaa muddo 12 bilood ah. Waxaa tirada markale la xisaabiyaa sanad walba.

**Qaabka Lacag Bixinta ee Elektarooniga: (866) 873-0944** ama

[www.seattle.gov/light/accounts/onlinepayment.asp](http://www.seattle.gov/light/accounts/onlinepayment.asp). Waxaad biilashaada ku bixisaa internetka ama xag taleefoon adigoo isticmaalaya kaararka amaahda ama bangiga. Waxaad kaloo ku bixin kartaa jeegagga Elektarooniga.

## Xadka u degsan dakhliga ayaa la adeegsanayaa marka ay noqoto gargaarka lacag bixinta ee soo socoto:

**Sicirka la dhimay: (206) 684-0268;** macaamiisha u qalma ee dakhligoodu yar yahay.

**Gargaarka Degdegga ee Dakhliga Hooseeya: (206) 684-3688;** gargaar mar ah, sanadkii.

**Gargaarka Dawladda Dhexe ee Kuleyliyaha Guriga: (800) 348-7144;** miisaaniyadda dawladda ee loogu talagalay kuwa soo hormara inta u dhaxeysa Noofembar iyo Juun.

**Mashruuca Wadaagga: (206) 684-3000;** gargaarka degdegga ah ee loogu talagalay macaamiisha dakhligoodu u qalmo ee ay la soo gudboonaatay mushkilo dhaqaale, oo ogeysiiska in korontada laga goynaayo ka helay Hay'adda Korontada Magaalada.

## Caawimaad ayaa loo baahan yahay: *Waxaad soo sheegtaa nalalka dariiqa ee haleysan..*

Waxaad wacdaa **(206) 684-7056** si aad u soo wargeliso nalalka dariiqa ee haleysan ama waxaad warbixinta ku soo gudbisaa internetka cinwaanka [www.seattle.gov/light/streetlight](http://www.seattle.gov/light/streetlight). Waxaannu doonaynaa in aan ogaanno:

- lambarrada huruudda ah ee ku yaal tiirarka nalalka dariiqa;
- cinwaanka dhismaha u dhow nalka dariiqa oo dhammeystiran;
- sharraxaad kooban ee dhibaataada.

Qiyaasta waqtiga ay inaga qaadato dayactirka xilliga jiilaalka waa **17 maalmaha la shaqeeyo.**

## Mahadsanid